

Miyay tahay in aad karantiin gasho ama go'doon lagu geliyo iyada oo sababtu tahay COVID-19, balse aadan haysan wakhtiga la is fasaxo ee lacagtiisa la bixiyo?

Barnaamijka Fasaxa Shaqada ee Ku meel gaarka ee Lacagtiisa La bixiyo ee COVID-19 ayaa caawiya shaqaalaha u baahan in ay karantiin galaan ama go'doon la geliyo iyada oo sababtu tahay soo gaarista COVID-19, ama dareemaya astaamaha cudurka ee raadinaya ogaanshaha cudurka, laakiin aan u qalmin fasaxa dhanka jirada ee lacagtiisa la bixiyo ee la xiriira COVID-19 (ama aan heli karin wakhtiga la is fasaxo ee lacagtiisa la bixiyo oo la xiriira COVID-19).

Dadka u qalma waxay heli doonaan lacan bixin dhan \$120 maalintii taasi oo ah ilaa 10 maalmo shaqo (isu geyntii \$1,200) marka u horreysa ee ay u baahdaan in ay karantiin galaan ama go'doon la geliyo.

Shaqaaluhu waa in ay buuxiyaan shuruudaha soo socda oo dhan si ay ugu qalmaan barnaamijka.

- In ay ka dhex shaqeysanayaan Oregon oo looga baahan yahay in ay xareeyaan canshuur celinta dakhliga ee Oregon.
- Karantiin lagu geliyay amar uu bixiyay maamulka caafimaadka dadweynaha ee degaanka, qabiilka ama daryeel bixiye caafimaad iyada oo sababtu tahay cudurka oo qofka ka soo gaaray qof qaba cudurka ama la leeyahay astaamo la xiriira cudurka COVID-19 isla markaana la raadinayo ogaanshaha cudurka.
- Aysan awoodin in ay shaqeeyaan (oo ay ku jiraan in internet ahaan guriga uga shaqeeyo 'telework') sababta oo ah waxay u baahan yihiin in ay karantiin galaan ama go'doon la geliyo.
- Aysan haysan dakhliga guud ee la sameeyo ee la isku dheelitiray oo ka badan \$60,000 shakhsigiiba ama si wadajir ah u sameeyeen \$120,000 canshuur celintoodii Oregon ee 2019. Haddii ay sameeyaan \$60,000 shakhsigiiba ama si wadajir ah u sameeyeen \$120,000 sanadkii 2019 ama haddii aysan xaraysan canshuur celintoodii Oregon ee 2019, ka dib marka way u qalmi doonaa haddii aysan filayn in ay sameeyaan lacag gaaraysa \$60,000 shakhsigiiba ama si wadajir ah u sameeyeen \$120,000 sanadka 2020. OGOW: Dakhliga guud ee la sameeyo ee la isku dheelitiray ee canshuurta celinta dakhliga shakhsi ahaaneed ee Oregon ee 2019 wuxuu ku yaalaa sadarka 7 ee Foomka 40 (dadka deganaa sanad buuxa), iyo sadarka 29F ee ku yaala Foomamka 40N (dadka aan deganayn) iyo 40P (dadka degan sanad barkii).
- Cidda ay u shaqeeyaan uusan bixin fasaxa dhanka jirada ee lacagtiisa la bixiyo ee la xiriira COVID-19 ama ay isticmaaleen fasaxooda dhanka jirada ee lacagtiisa la bixiyo ee la xiriira COVID-19.
- Aysan codsanayn faa'iidooyinka caymiska shaqo la'aanta oo loogu talagalay wakhtiga la is fasaxo iyada oo ay sababtu tahay karantiin la galo ama go'doon la is geliyay.
- Aysan codsanayn faa'iidooyinka magdhawga shaqaalaha oo loogu talagalay wakhtiga la is fasaxo iyada oo ay sababtu tahay karantiin la galo ama go'doon la is geliyay ama la dareemayo astaamaha COVID-19.
- Aysan raadinayn ama isticmaalaynin faa'iidooyinka ka socda barnaamijyada gargaarka karantiinka COVID-19 oo ka jira Oregon ama gobol kale.
- Aysan codsanayn ama helayn noocyo kale oo ah fasaxa shaqada ee lacagtiisa la bixiyo oo ka socda cidda ay u shaqeeyaan inta lagu jiro karantiinka ama go'doonka, sida in aan la isticmaalayn fasaxa dhanka jirada ama fasaxa caadiga ah.
- Uusan shaqada ka fariisin ama uu fasax shaqo siisay cidda ay u shaqeeyaan.
- Waa in ay soo ogeysiyeen cidda ay u shaqeeyaan in ay baahan yihiin in ay karantiin galaan ama go'doon la geliyo.
- Waxa la sheegan karaa oo kaliya hal waqti karantiinka ah.

Shaqaalaha u qalma waa in ay foomka internet-ka ka buuxiyaan oregon.gov/covidpaidleave waxaa laga codsan doonaa in ay bixiyaan macluumaad shakhsi, faahfaahinta cidda loo shaqeeyo iyo shirkadda, iyo faahfaahinta karantiinka. Haddii aadan haysan oo geli karin codsiyada elektarooniga ah [833-685-0850](tel:833-685-0850) (khadka bilaashka ah) ama [503-947-0130](tel:503-947-0130). Wixii caawimaad ah oo luqad kale ah, wac [503-947-0131](tel:503-947-0131). Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo oregon.gov/covidpaidleave.

Iyada oo loo hoggaansan yahay Sharciga Dadka Naafada ah ee Maraykanka (ADA), daabacaadani waxaa la helayaa iyada oo u qoran qaab kale. Wac [503-947-0130](tel:503-947-0130).